

DEVELOPMENTAL DISABILITIES ADMINISTRATION (DDA)

## **Hab-maamuska Eegidda Maqaarka** **Skin Observation Protocols**

**Client's Name and Address**

**Client Representative's Name and Address**

Gacaliye ,

Waxaan dhowaan dhammeynay u-kuurgelidda baahiyadaada daryeelka iyo adeegga annaga oo adeegsanayna qalabka U-kuurgelidda Dhammeystiran iyo Qiimeynta Ka-warbixinta (CARE). Intii aan buuxinayay u-kuurgelidaada, anniga oo ku saleynaya macluumaad aan ka helay adiga, daryeelayaashaada, taariikhda caafimaadkaaga, iyo arrimaha kale ee halista ah, waxaan bixinaynaa macluumaad si aan kuugu caawino in aad hesho daryeel wanaagsan, iyo sidoo kale si aan u barno oo aan ugu wargelino daryeelayaashaada, iyo bixiyayaasha kale ee daryeelka caafimaad ee laga yaabo in ay ku caawinayaan.

U-kuurgelidaada CARE ee DDA waxaa ay go'aamisay in aad halis ugu jirto isbeddelo ku yimaada maqaarkaaga, sida burburka maqaarka ee sababta u ah cadaadiska in uu keeni karo dhibaatooyin halis ah sida caabuuq iyo xataa dhimasho sidaa awgeed waxaa loo baahan yahay in lagu gudbiyo kalkaaliye caafimaad si uu u buuxiyo qiimeynta maqaarka. Kalkaaliye caafimaad ayaa shan (5) maalmood gudahooda kula soo xiriiri doono si uu kuugu jadwaleeyo qiimeynta. Haddii kalkaaliyaha caafimaad uusan awoodin in uu ballan kuu qabto ka-dib labo isku-dayo oo bixiyaha daryeelkaaga caafimaad ee aasaasiga ahna uusan DDA siinin u-kuurgelidda xaaladda maqaarkaaga ee hadda, maareeyaha kiiskaaga ayaa loo baahan yahay in uu kuu gudbiyo CPS ama APS.

Marka qofka uu halis ugu jiro burburka maqaarka ee sababta u ah cadaadiska waxaa jira daryeel aasaasi ah oo aad adiga bixin kartid, ama lagu siin karo, si loo xaqiijiyo in maqaarkaaga uu caafimaad-qabo. Halkan waxaa ku qoran talooyin guud oo la raaco. Waxaa intaa dheer, haddii aad waligaa qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan daryeelka maqaarka, ama isbeddelo ku yimaada muuqaalka maqaarka, waa in aad si degdeg ah u wacdo takhtarkaaga ama bixiyaha kale ee daryeelka caafimaad.

1. Haddii aad caawimo ugu baahan tahay qubeyska ama daryeelka shaqsi, wayddii qofka ku caawinaya in uu eego goobaha lafleysta ah ee jirkaaga oo uu ka raadiyo wax isbeddelo ah oo ku yimid midabka maqaarkaaga, xannuun ama ur.
2. Haddii aad awoodo in aad adiga laftaada qubeysato, ka eeg maqaarkaaga wax isbeddelo ah inta aad qubeysanayso, isbeddel maqaar, xannuun, ama ur.
3. Kala hadal takhtarkaaga, kalkaaliye caafimaad ama bixiyaha daryeelka caafimaad ee kale. Wayddii in ay maqaarkaaga ka eegaan wax isbeddelo ah, haddii aad qabto wax su'aalo ama walaac ah, wayddii talooyin ku saabsan sida loo daryeelo maqaarkaaga haddii aad ku qabtid wax nabaro ah ama isbeddelo kale maqaarkaaga.
4. Isticmaal agabka waxbarasho ee ku lifaaqan si ay kuugu caawiyaan in aad fahamto sida ugu wanaagsan ee loo daryeelo maqaarkaaga.

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan macluumaadkan, fadlan kala xiriir . Isaga / iyada waxaa ay kuu gudbin doonaan kalkaaliye caafimaad ama khayraadka daryeel caafimaad kale si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Daacadnimo,

Maareeyaha Khayraadka / Kiiska ee DDA  
Ku-lifaaqan